

Ardayda Afarta Sanno ee Dugsiga Sare Lakeside waxay u Dalaceen Is reebreebka Tartanka Deeqda waxbarashada National Merit

Shirkada Deeqda waxbarashada National Merit ayaa ku dhawaaqday Sebteembar 11 in sedex arday heer sare oo dugsiga sare DCSD ah ayaa loo magacaabay inay noqdaan kuwa is reereebka soo galay ee Barnaamijka Deeqda waxbarashada National Merit.

Ardayda afarta sanno ee Dugsiga Sare Lakeside Henry Fonder-Kristy, Andrew Heller, iyo Edward Rauch ayaa ka mid ah 16,000 ee soo galay is reebreebka wadankoo dhan. Waxay hadda ku tartamayaan 6,870 oo Deeqda waxbarashada National Merit oo gaareyso ku dhawaad \$26 milyan. Guuleystayaasha tartanka waxay helayaan illaa \$2,500 ee ka imaaneyso Shirkada Deeqda waxbarashada National Merit, cadad aan la shaacin ee ka imaanayo abaal marinada Deeqda waxbarashada Heerka sare ee shirkada ka faala qaaday, iyo abaal marinada Deeqaha waxbarashada Heerka sare ee kulliyada ka faalo qaado.

Tartamayaasha dhexe waxaa lagu xushay sida ku saleysan diiwaanada waxbarashada heerka sare, tallooyinka dugsiga, qormada qoran, iyo u qalmida buundooyinka SAT ama ACT. Si aad u noqotid tartamaha ugu dambeeyo, tartamayaasha dhexe iyo saraakiisha dugsiga sare waa inay gudbiyaan codsiga deeqda waxbarashada sharaxan oo ay ku jiraan diiwaanada waxbarashada, ka qeybqaadashada dugsiga iyo howlaha bulshada, awoodaha hogaaminta la muujiyay, shaqada, iyo sharafeynada iyo abaalmarinada.

Kuwa ku soo hara is reebreebka waxaa la soo ogeysiinaya Febraayo gudaheeda, iyo dhammaan helayaasha Deeqda waxbarashada National Merit ayaa laga xulanaya kooxdaan.

Kooxda tartamayaasha isreebreebka, oo ka kooban wax ka yar boqolkiiha hal ee ardayda sannadka afaraad dugsiga sare ee Mareykanka, ayaa mataleyso ka qeybqaatayaasha ugu buundada badan ee gobol walba. Tirada tartamayaasha is reebreebka ee gobolka waxay la mid tahay boqoleyda gobolka ee wadarta qaranka ee ardayda sannadka afaraad ee qalin jabineyso.

Wixii warbixin dheeraad ah ee Barnaamijka Deeqda waxbarashada National Merit, fiiri <https://www.nationalmerit.org/>.

XXX